



Dhaqtar Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

Mudane Dijon DaCosta, Sr., *Guddoomiyaha Guddiga*  
 Marwo Deirdre P. Pierce, *Guddoomiye Ku xigeen*  
 Marwo Anna Hill  
 Gabar Whitney McGinniss  
 Marwo Allyson Gevertz  
 Marwo Vickie B. Turner  
 Dhaqtar Joyce Morley

## SIIDEYNTA WARBAAHINTA

Arbacada, Maarso 13, 2024

## Xiriirka:

Donald Porter, *Ed.D.* 678-481-4110  
 Carla Parker 404-734-1717

## DCSD waxay balaarisaa Barnaamijka Deganaanshaha Macalinka IGNITE DeKalb oo lagu darayo Xirfadlayaasha Wax looga Qabanayo Gabaabsiga Macalinka

*18 Xirfadlayaal ayaa bilaabay Barnaamij Labo Sanno ah*

(STONE MOUNTAIN, GA)- Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) ayaa ku faana ku dhawaaqida iskaashiga xeelada ee Jaamacada Point Park iyo BloomBoard, kaasoo bilaabay Barnaamijka Deganaanshaha Macalinka IGNITE DeKalb. Dadaalkaan, oo bilaabmay isbuucaan, wuxuu siiyaa xirfadlayaasha degmada wado ay ku kasbadaan Waxbarashada Dugsiga hoose ee la aqoonsanyahay iyo shahaadada Waxbarashada Gaarka ah, iyadoo lagu dhafayo waxbarashada onleenka waaya aragnimada fasalka fool ka foolka ah.

Barnaamijkaan hormuudka ah ee Georgia wuxuu hiigsanayaa inuu hormariyo xirfada deegaanka iyo yareynta gabaabsiga macalinka. Kooxdii ugu horeysa ee sideed iyo tobanka kaaliyayaasha DCSD ayaa hadda ka diiwaangashan Barnaamijka Deganaanshaha Jaamacada Point Park oo waxay bilaabeen safarkooda si ay u sii wataan shahaadadooda koowaad ee jaamacada, iyadoo ay ka go'antahay ku darida shaqada koorsada iyo waxbarida gacan ku oolka ah oo 2-3 sano ee xigta.

[Barnaamijka Deganaanshaha Macalinka IGNITE DeKalb](#) waa wado cusub oo wax ka qabataa gabaabsiga macalimiinta u qalma iyadoo siineyso waddo kale oo waxtar leh shahaadeynta macalinka. Dhaqtar Horton ayaa ku nuuxnuuxsaday muhiimadda balaarinta barnaamijkaan ugu dambeeyo.

“Iyo Barnaamijka Deganaanshaha Macalinka IGNITE DeKalb, waxaan sii wadeynaa maalgelinteenaa geesinimada leh ee mustaqbalka bulshadeena. Intaas waxaa dheer sare u qaadida tayada waxbarashada degmadeena, balaarintaan ugu dambeyso waxay siisaa xal kaloo waara gabaabsiga macalinka iyadoo la xoojinayo xirfadlayaasheena ka go'antahay iyo kartida leh iyo xirfadaha iyo shahaadaha looga baahanyahay inay ugu kobcaan sida sida macalimiin,” Dhaqtar Horton ayaa yiri. “Qeybtaan gaarka ah ee hindisahaan ayaa ah in kooxdaan xirfadlayaasha dhiiran ay joogteyn karaan doorarkooda caadiga ah iyadoo ka qeybqaadanayo barnaamijkaan shahaadada.”

BloomBoard, bixiyaha hormarinta kartida qaranka ee nidaamyada dugsiyada K-12, waxay fududeysaa suuq geynta barnaamijka, hirgelinta, iyo hagida, iyadoo isticmaalaya boggaga onleenka si ay u gaarsiiyaan manhajka. Barnaamijka, waxaa lagu maalgeliyaa lacagta deeqda COVID-19, waxay uga baahantahay ka qeybqaatayaasha inay ka shaqeeyaan gudaha DCSD oo shan sanno kadib dhameystirka, iyadoo la hubinayo faa'idooyinka muddada dheer ee bulshada.

Wixii warbixin dheeraad ah oo balaarintaan BloomBoard iyo Jaamacada Point Park ee loogu talloagalay kaaliyayaasha hadda ee DCSD, arag <https://bloomboard.com/program/ignite-dekalb/>. Wixii warbixin guud ee ku saabsan Barnaamijka Deganaanshaha Macalinka IGNITE DeKalb, arag <https://www.dekalbschoolsga.org/ignite/>.

XXX